Doorashada Hooyga Daryeelka

tilmaanta la siiyo macaamilka

MINNESOTA NETWORK OF
HOSPICE & PALLIATIVE CARE

Shabakada Hooyga Daryeelka iyo Daryeelka Xanuunka Minnesota (Minnesota Network of Hospice & Palliative Care) (MNHPC) waxay horumarisaa tayada nolosha bulshadena, waxayna taa u adeegsataa hooyga daryeelka iyo daryeelka xanuunka. Si loo gaaro ujeedadaan, MNHPC waxay ballan ku qaaday in ay ahaato:

» Fududeeyaha isbaddalka hiddaha iyo bixinta dagganaashada iyo daryeelka dhamaadka nolosha.

» Codka hooyga daryeelka, daryeelka xanuunka iyo daryeelka horay loo qorsheeysto.

» Xoog si loo tababaro shakhsiyaadka iyo ururada.

Xubnaha bixiyeyaasha badan ee ka jira Minnesota, shaqada MNPHC waxay taabataa bulshadaha ka jira gobolka oo idil.

Asal ahaan waxaa lagu qoray deeq laga haysto Mu'asasada Allina (Allina Foundation) sannadkii 1997 taasoo qeyb ka ah Barnaamijkeeda Mashruuca DECIDE.
© 1997 Minnesota Hospice Organization (Ururka Hooyga Daryeelka Minnesota). Xuquuqda isticimaalka oo dhan waxaa iska leh.
© 2nd Edition, Revised 1998 (Soo Saarka 2aad, La Baddalay 1998). Xuquuqda isticimaalka oo dhan waxaa iska leh.
© 3rd Edition, Revised 2000 (Soo Saarka 2aad, La Baddalay 1998). Xuquuqda isticimaalka oo dhan waxaa iska leh.
© 4th Edition, Revised 2009 (Soo Saarka 2aad, La Baddalay 1998). Xuquuqda isticimaalka oo dhan waxaa iska leh.
© 5th Edition, Revised 2010 (Soo Saarka 2aad, La Baddalay 1998). Xuquuqda isticimaalka oo dhan waxaa iska leh.

Jadwalka Tusmada

Horudhaca 2

Maxaa hooyga daryeelka ka dhiga wax khaas ah? 4

Sidee ayuu hooyga daryeelka u taageeri doonaa qoyskeyga? 6

Sidee loo bixiyaa daryeelkeyga? 8

Sidee ayaan ku helaa barnaamijka hooyga daryeelka? 10

HORUDHACA

Fikradda in adiga ama qof aad jeceshahay uu ku sugan yahay dhimasho waxay ahaan kartaa wax culus. Waxaa dhici karto in ay u muuqato in dhamaan tahay rajo la'aan, in aysan jirin wax dheeraad ah oo aad samayn kartid.

Waxaad samayn kartaa wax badan. Waxaad heli kartaa hooyga daryeelkakaasoo kugu kaalmeeya in aad u noolaatid si wanaagsan adiga oo haysta jeceelka iyo taageerada qoyska iyo asxaabta.

Hooyga daryeelka waa siyaabo gaar ah oo loo daryeelo dadka qaba xanuun aan laga soo kabsan doonin.

Daryeelka Waayeelka

- wuxuu xoogga saaraa sida buuxa aad ugu noolaan lahayd maalmaha kuu haray sida suurtogalka ah.
- waxay laga helaa naxariista xanuunkajirka, nafsadda iyo caatifadda badanaa la socota cudurka aan laga soo kabsan doonin.
- waxay daryeeshaa qofka oo idil iyo qoyska.
- wuxuu taageerada calool xumada siiyaa qoyska nool.

"Macno ayay kuu leedahay ilaa daqiiqada ugu dambeyso, anagana waxaan sameyn doonaa ilaa inta aan awoodno, mana aha oo keliya in aad si nabad ah u dhimatid, balse noolaatid ilaa aad ka dhimatid."

Dame Cicely Saunders, aasaasaha hooyga daryeelka kowaad

"Waad ku mahadsan tahay in aad daacad ii ahaatid, wax i bartid, qabatid gacanteyda, i hoggaamisid, i daryeeshid, ila qososhid, i kaalmeysid si kasta oo suurtogal ah iyo marmar siyaabo aan suurtogal ahayn."

Judy, saaxiibta bukaanka ku sugan hooyga daryeelka

Sida waafaqsan xaaska bukaanka ku sugan hooyga daryeelka, "Waxaan ogsooneyn in waxa lagu sheegay Mark aysan ahayn wax fiican, hase ahatee waxaan kaloo ogeyn in aan maanta haysano iyo in aan haysano kaalmada hooyga daryeelka. Taasi, waxaan go'aan ku gaarnay in aan sameyno waxa aan samayn kari lahayn maanta - iyo maalin kasta oo hartay. Rajadena waxay ahayd in aan maalin kasta ka sameyno hal xasuus wanaagsan. Hal maalin waxay ahayd qado khaas ah noo ah labadena oo keliya; maalin kale waxaan habeynay sawiro iyo waxaan sheekooyin u duubnay caruurta Waxyaabo fudud sida kuwaas. Marka aad ka fakartid, ma aha hab xun uu qofka u noolaado."

Ujeedada buugyarahaan waa in la muujiyo sida hooyga daryeelka u kaalmeyn karo. Erayada waxaa laga soo qaaday dad ku nool Minnesota oo waayo aragnimo toos ah kala kulmay hooyga daryeelka. Erayadooda waxay muujiyaan sida hooyga daryeelka iyaga ugu kaalmeeyay in ay aad uga fa'iideystaan maalmaha ugu dambeeyo kuwa ay jecel yahiin.

Kuwa hortaagan go'aanada adag ee la socda cudurka aan laga soo kabsan doonin, waxay heli karaan kaalmo, halkaas ay rajada aad ugu nooshahay hooyga daryeelka.

MAXAA HOOYGA DARYEELKA KA DHIGA KHAAS?

"Fikradaha gudaha iyo daacadnimada falsafadda hooyga daryeelka ayaa noo ogolaatay in aan garasho badan iyo sharaf uga gudubno waqtigaan adag taasoo ka duwan sida ay ila ahayd in ay tahay suurtogal."

Rachel, gabarta bukaanka isbitaalka

"Hooyadena waxay awood u yeelatay in ay ku dhimato ku dhawaad xaalad wanaagsan. Asturnaanta waxay noo ogolaatay in aan si furfuran wax uga qabano dareenkena iyo in aan qof ahaan u dajino hooyadeen."

George, wiilka bukaanka ku sugan hooyga daryeelka

Hooyga daryeelka waxay xididdo ku leedahay hiddaha soo jiray boqolaal sanno ee ku saabsan hadiyadaha loo diyaariyo kuwa kujira safar dheer. Maanta hooyga daryeelka waa nooc khaas ah oo ka mid ah daryeelka dadka qaba cudur aan laga soo kabsan doonin si ay bilaha ugu dambeeyo noloshooda ugu noolaadaan dagganaan iyo sharaf.

Hooyga daryeelka waxaa laga helaa kaalmada jirka, caatifadda iyo nafsiga, adiga iyo qoyskaada xaalad kasta aad ku sugan tahiin u heshaan dagganaanta ugu badan.

KOOXDA DARYEELKA OO ALBAABKAADA TAAGAN

Hooyga Daryeelka wuxuu albaabkaada keenaa kooxda daryeelka - haddii gurigaada uu yahay guri gaar ah ama abarman, goob lagu xanaaneeyo dadka, meel lagu kaalmeeyo nolosha ama hooyga daryeelka daggan yahay.

Daryeelka waxaa laga heli karaa takhtarkaada iyo kooxda hooyga daryeelka aqoonyaanada ay ka midka yahiin kalkaaliyeyaasha, shaqaalaha arrimaha bulshada, kaaliyeyaasha caafimaadka guriga, bixiyeyaasha xanaanada nafsiga, kuwa ku shaqeeyo iskaa wax u qabso iyo la talliyeyaasha calool xumada. Bacdamaa baahidaada yahiin gaar, kooxda hooyga daryeelka waxay kaala shaqeysaa si loo horumariyo qorshaha ku kooban qofka si loo fulliyo daryeelkaada.

KOOXDA HOOYGA DARYEELKA

Adiga iyo qoyskaada waxaad ku jritaan gunta kooxda daryeelka waayeelka iyo waxaad ku sugan tahiin bartamaha dhamaan gaarista go'aanada.

TAKHTARKAADA
Takhtarka aad dooratay ayaa hoggaamiya daryeelkaada.

KALKAALIYAHA
Kalkaaliyaha hooyga daryeelka wuxuu iskuduwaa daryeelka iyo wuxuu maamulaa calaamadahaada.

SHAQAALAHA BULSHDADA
Shaqaalaha bulshada hooyga daryeelka wuxuu qoyskaada ku kaalmeeyaa in ay iskuduwaan adeegyada iyo wuxuu aqoonsadaa ilaha bulshada.

BIXIYAHA DARYEELKA NAFSIGA
Bixiyaha daryeelka nafsiga hooyga daryeelka waxaa laga helaa taageerada nafsgiga wuxuuna la shaqeyaa bulshadaada waxa aad aaminsan tahay.

ADIGA IYO QOYSKAADA*

LA TALLIYAHA CALOOL XUMADA
Calool xumada hooyga daryeelka, la talliyaha wuxuu taageero siiyaa qoyskaada.

KAALIYAHA CAAFIMAADKA GURIGA
Kaaliyaha caafimaadka guriga waayeelka waxaa laga helaa kaalmada qabeyska iyo daryeelka kale ee qofka la siiyo.

DAWEEYEYAASHA KALE
Waxaa la heli karaa daweeyaha jirka, dhaqaaqa, nafaqada iyo/ama daweeyaha hadalka si laguu dajiyo.

AGAASIMAHA CAAFIMAADKA
Agaasimaha caafimaadka hoogyga waayeelka wuxuu kor ka maamulaa daweynta ay bixiyaan kooxda hooyga daryeelka iyo wuxuu iskuduwid la sameyaa takhtarka ku qoran.

DADKA ISKAA WAX U QABSO KU SHAQEEYO
Qofka iskaa wax u qabso uga shaqeeyo hooyga daryeelka wuxuu bixiyaa adeegyo kala duwan, sida wehelka iyo daryeelka nasashada si nasasho loo siiyo qoyskaada.

Qoyska waxaa ka mid ah qaraabada, asxaabta, deriska, ama qoyskaa balaaran.

SIDEE AYUU HOOYGA DARYEELKA U TAAGEERI KARAA ANIGA IYO QOYSKEYGA?

Inta badan qoysaska waxay qabaan waayo aragnimo yar ama fikrada kama qabaan daryeelka qof ku sugan dhimasho mana u maleyaan in ay qaadi karaan mas'uuliyadaan. Tani waa meesha hooyga daryeelka uu ka geysan karo kaalmo.

Hooyga daryeelka wuxuu bixiyaa taageerada, tababarka iyo aqoonta u suurtogelin doonto qoyskaada in uu bixiyo daryeelka loo baahan yahay.

Qoyskaada waxaa laga filaa, kaddib marka ay hoggaamin ka helaan kooxda hooyga daryeelka, in ay:

- bixiyaan jawi ammaan ah oo daggan xagga daryeelkaada
- ogeysiyaan kooxda hooyga daryeelka isbaddalada xaaladaada
- kaalmada baahida shakhsiga sida quudinta, qabeyska, geddinta iyo siinta dawooyinka

Daryeelka qof kasta waa isbaddalaa. Qaar waa firfircoon yahiin waana madax banaan yahiin. Qaar waxay ku aruureen sariirta, waxayna u baahan yahiin daryeel badan. Qaar waxay u baahan yahiin in yar oo laga soo qaado labadaba. Soo noqnoqoshada iyo nooca adeegyada hooyga daryeelka waxaa loo sameyay in lala kulmo baahidaada iyo tan qoyskaada.

"Waxaan dareemay culeys aad u badan oo ka dhaca garbaheyga maxaa yeelaay waan ogsoonaa in ay jiri doonaan dad la tababaray oo qoyskena la wadaago daryeelka odaygeyga."

Shirley, xaaska bukaanka ku sugan hooyga daryeelka

SI LAGUU TAAGEERO ADIGA IYO QOYSKAADA, BARNAAMIJKA HOOYGA DARYEELKA:

» waxaa laga helaa dajin, sida dawooyinka iyo daweynta lagu qaado xanuunka iyo calaamadaha.

» waxaa la helaa 24 saac maalintii si looga jawaabo su'aalaha.

» wuxuu bixiyaa la-tallin iyo taageerada nafsiga.

» wuxuu baraa farsamooyinka daryeelka gaarka ah, sida geddinta, meeleynta iyo wareejinta, qabeyska iyo siinta dawooyinka.

» wuxuu qorsheyaa qalabka loo baahan yahay sida sariirta isbitaalka, oksojiinka, kommodiinka dhinaca sariirta, iyo kursiga lugaha leh.

» isku dabaridaa kaalmo kasta oo dheeraad ah iyo adeegyada looga baaahan yahay guriga.

» wuxuu bixiyaa macluumaad iyo habab kale, sida guryaha xanaanada ama hooyga daryeelka daggan yahay.

» wuxuu bixiyaa adeegyada taakuleynta calool xumada, lagana yaabo in ay ka mid yahiin warqadaha, telefoonka iyo xariirka shakhsiga, la-tallinta, iyo fursadaha lagu qeybsado waayo aragnimada kooxaha taageerada habyeysan.

MAXAA DHACA HADDII AAN NOOLAHAY KELIGEY AMA AYSAN JIRIN QOYS II DHAW?

Barnaamijka hooyga daryeelka wuu kula shaqeyn doonaa si aad wax uga qabatid xaaladda kuu gaarka ah iyo si aad u hubisid fiyoobidaada iyo ammaankaada.

Adeegyada Laga Helo Medicare

- **Adeegyada takhtarka**
- **Daryeelka kalkaalinta**
- **Qalabka caafimaadka**
- **Saadka caafimaadka**
- **Dawooyinka loo qaato maamulka calaamadda iyo ka qaadidda xanuunka***
- **Daryeelka bukaan jiifka muddada gaaban**
- **Daryeelka nasashada***
- **Kaaliyaha caafimaadka guriga iyo adeegyada kaalmada guriga**
- **Daweynta jirka, dhaqaaqa, iyo hadalka**
- **Adeegyada bulshada caafimaadka**
- **Raashinka iyo la-tallinta kale**

**Medicare waxay bixisaa dhamaan kharashka ku baxa adeegyadaan. Hase ahatee, hooyga daryeelka waxay haysataa fursad ay ku soo dallacdo kharashka lagu daro ilaa shan doolar halkiii daawo la qoro iyo kharash yar oo lagu daro nasashada bukaanka jiifka.*

YAA XAQ U LEH HOOYGA DARYEELKA?

Hooyga daryeelka wuxuu ku habboon yahay dadka qaba cudur aan laga soo kabsan doonin, sida uu u garto takhtarka bukaanka. Waxaa la bixiyaa daryeelka iyadoo aan la fiirinin da'da, asal qaran, jaadka qofka, isirka, caqiidada ama kacsiga qofka.

SIDEE LOO BIXIYAA KHARASHKEYGA?

Adeegyada daryeelka waayeelka waxaa bixiya Medicare, Kaalmada Caafimaadka (Medical Assistance), MinnesotaCare iyo ceymiska ganacsiga. Barnaamijka hooygaada waayeelka wuxuu la shaqeyaa adiga iyo qoyskaada si aad u heshaan siyaabo loo bixiyo kharashka adeegyada. Hase ahatee, waa la bixiyaa daryeelka iyadoo aan la fiirinin awoodda aad u leedahay in aad bixisid.

MEDICARE

Hooyga daryeelka waxaa looga hadlaa Manaafacaadka Hooyga Daryeelka Medicare, Qeybta A (Medicare Hospice Benefit, Part A). Waxaad dooran kartaa manaafacaadkaan dhamaystiran haddii:

- aad xaq u yeelatid Medicare Part A (Medicare Qeybta A)
- takhtarkaada iyo agaasimaha caafimaadka hooyga daryeelka xaqiijiyaan in aad qabtid cudur aan la daweyn karin lana fisho in qofka uu noolaado ilaa lex bil ama ka yar
- aad isku qortid hooyga daryeelka baddalkii manaafacaadka caadiga ee laga qaatoo Medicare si loo daryeelo cudurka aan la daweyn karin
- aad daryeel ka heshid barnaamijka hooyga daryeelka ay Midicare aqoonsatay

Medicare bixiso oo keliya adeegyada uu soo ogolaado barnaamijka hooyga daryeelka. Daryeelka joogtada ah waxaa la bixiyaa oo keliya waqtiyada lala kulmo dhibaatada caafimaadka. Waxaad joojin kartaa manaafacaadka aad ka heshid hooyga daryeelka waqti kasta kaddibna waxaad bilaabi kartaa manaafacaadkaada caadiga ee Medicare

Inta aad ku qoran tahay hooyga daryeelka, waxaa weli la heli karaa manaafacaadka caadiga ee Medicare si loo daweeyo dhibatooyinka caafimaadka aan la xariirin cudurka aan la daweyn karin, iyo waxaa kaloo la heli karaa dhamaan manaafacaadka Qeybta B xagga adeeygada takhtarka.

Haddii Medicare aysan aqoonsaneyn hooyga daryeelka aad dooratay, waxay ku siin doontaa adeegyada qaar iyo waxay la shaqeyn doontaa wakaalado kale si loo bixiyo adeegyada ay Medicare bixin doonto.

KAALMADA CAAFIMAADKA (MEDICAL ASSISTANCE) IYO MINNEOSTACARE

Haddii aad xaq u leedahay Kaalmada Caafimaadka (Medical Assistance) iyo Minnesota Care, waxaad kaloo leedahay manaafacaadka hooyga daryeelka, sida adeegyada la midka ah Manaafacaadka Hooyga Daryeelka Medicare (Medicare Hospice Benefit).

CEYMISKA GANACSATADA

Haddii aad ceymiska caafimaadka ka qaadatid shirkadda ceymiska, inta badan kiisaska, waxaad xaq u leedahay manaafacaadka hooyga daryeelka. Haddii aadan hubin manaafacaadka hooyga daryeelka ee ku jira qorshaha ceymiskaada, la hadal ceymiyahaada ama wakiilka hooyga daryeelka.

SIDEE AYAAN KU HELAA BARNAAMIJKA HOOYGA?

Macnaha in aad dooratid hooyga daryeelka waa in aad adiga go'aan ku gaartay in aad dabagashid daryeelka xoogga saara dagganaashada in aad maalmaha kuu haray ugu noolaatid si buuxdo sida suurtogalka ah.

Takhtarkaada kala hadal marka hooyga daryeelka kugu habboon yahay adiga. Ha ogaado isaga ama iyada in aad xiiso u qabtid hooyga daryeelka, iyo weydiiso kaalmo si aad u sameysatid go'aankaas. Waxaad kaloo la hadli kartaa kalkaaliyehaada ama waxaad si toos ah ula xariiri kartaa barnaamijka hooyga daryeelka.

Barnaamijyada hooyga daryeelka waxay qorshe la samaysteen isbitaalada guryaha xanaanada bukaan socodka muddada gaaban iyo daryeelka nasashada. Haddii aad dooneysid isbitaal gaar ah ama hay'ad, weydii barnaamijyada hooyga daryeelka ee adeeyada ka bixiyo halkaas.

Waaxda Caafimaadka Minnesota (Minnesota Department of Health) waxay shatti siisaa barnaamijyada hooyga daryeelka iyo waxay fullisaa wareysiyada goobta si laguugu adkeeyo in hooyga waayeelkla kulmo tilmaamaha tayada.

Intaas waxaa dheer, barnaamijyada hooyga daryeelka waxay dooran karaan in ay qaataan Shahaadada Medicare una hoggaansamaan tilmaamaha federaalka u dajiyay daryeelka iyo habka wareysiga.

Haddii takhtarkaada uusan haynin tallo, waxaad ka hubsan kartaa Shabakada Hooyga Daryeelka iyo Daryeelka Xanuunka Minnesota (Minnesota Network of Hospice & Palliative Care), telefoonka 651.659.0423 ama telefoonka lacag la'aanta 800.214.9597 si aad u heshid liiska barnaamijyada shattiga ka haysta gobolka iyo shahaadada ka haysta Medicare ee u adeega bulshadaada. Waxaad kaloo wici kartaa Waaxda Caafimaadka Minnesota (Minnesota Department of Health), telefoonka 651.201.4101.

MAXAA DHACA HADDII AY JIRAAN ARRIMO AAN KA QABO DARYEELKA LEY SIIYO?

Waxaad xaq u leedahay in aad joojisid adeegyada hooyga daryeelka waqt kasta ama waxaad ku wareegi kartaa barnaamij kale oo ku hawlan hooyga daryeelka.

Kooxdaada hooyga daryeelka waxay kula fiirin doontaa Sharciga Xuquuqda Bukaanka Hooyga Daryeelka. Warqadaan waxay ku siisaa macluumaad ku saabsan xuquuqda aad leedahay bukaan ahaan iyo sida wax looga qabto arrimaha laga yaabo in aad ka qabtid daryeelkaada.

Waxaad kaloo kaalmo ka raadsan kartaa Waaxda Xaafimaadka, Xafiiska Ashtakooyinka Caafimaadka Goobta (Department of Health Office of Health Facility Complaints), telefoonka 800.369.7994 ama Xafiisha Cabbashada Daryeelka Muddada Dheer (Office of Ombudsman for Long Term Care), telefoonka 800.657.3591.

MA U BAAHANAHAY DARDAARANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA?

Lagaagama baahna in aad yeelatid Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka (Health Care Directive) si aad isugu qortid hooyga daryeelka. Hase ahatee, waa fikrad fiican in lagu fakaro qoraalka Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka (Health Care Direcgtive) si aad qoyskaada ugu kaalmeysid in ay go'aano ka gaaraan dhankaada haddii aysan kuu suurtogelin in aad sidaas sameysid.

Dadka waaweyn ee aqoonta u leh waxay xaq u leeyahiin in ay gaaraan go'aanada daryeelka caafimaadka ee u gaarka ah, kana mid ah xaqa ay u leeyahiin in ay go'aan ka gaaraan nooca daryeelka caafimaadka ay ogoladaan, diidaan ama joojiyaan. Hase ahatee, waxaa jirta waqtiyo aadan dadka kale ogeysiin karin rabitaankaada. Tani waa sababta ay muhiim u tahay in rabitaankaada lagu sheego qoraal ahaan.

Waxaa jira arrimo badan oo muhiim ah oo loo baahan yahay in laga fakaro. Wadahadalada aad la yeelatid qoyskaada, asxaabta, takhaatiirta, wadaadada iyo dadka kale ee muhiimka kuu ah adiga waxay caddeyn karaan waxa aad adiga rabtid. Shaqaalaha hooyga daryeelka waxay diyaar u yahiin in ay ku siiyaan macluumaadka ku saabsan mowduucaan.

QAAMUUSKA ERAYADA

Cudurka Aan La Daweyn Karin

Cudur ama xaalad aan la daweyn karin loona celin karin gadaal. Marka qof lagu tilmaamo in uu qabo xanuun aan laga soo kabsan doonin, waxa la fisho waa dhimasho muddo gaaban.

Dardaaranka Daryeelkaa Caafimaadka

Warqadda sharciga ee la siiyo dadka si ay u sheegaan rabitaankooda ku saabsan daryeelka caafimaadka, daweynta iyo waxa ay jecel yahiin haddii ay ku dhacdo itaal darri. Dardaaranka daryeelka caafimaadka waxaa ka mid ah dardaaranka caafimaadka, dardaaranka nolosha, iyo wakaaladda caafimaadka ee la siiyo qareenka. Qofka loo magacaabay in uu gaaro goo'aano haddii lala kulmo itaal darri waxaa lagu magacaabaa wakiilka daryeelka caafimaadka.

Daryeelka Nashashada

Daryeelka muddada gaaban ee laga yaabo in lagu bixiyo isbitaalka ama goobta kalkaalinta si ay qoyska fiyoobi uga siiyaan daryeelka maalin kasta la siiyo bukaanka.

Daryeelka Xanuunka

Daryeelka qofka ka qaada xanuunka iyo dhibka iyo kantaroosha calaamadaha qofka burburiya hase ahatee ma ka celiso dhimasho.

Daryeelka Xanuunka

Daryeelka ahamiyadda siiya sida waxa looga qaban lahaa calaamadaha loona sameyay in lala kulmo baahida aan la soo koobi karin ee bukaanka qaba xaalad soo noqnoqota. Bukaanka qaar ee la siiyo daryeelka caafimaadka waxay raadsadaan daryeelka daweynta, taasoo ka duwan hooyga daryeelka.

Hay'adda Kalkaalinta

Hay'adda ay ku jiraan dad badan oo daryeel siisa dadka u baahan adeegyada aasaasiga ama xirfadaha ay bixiyaan shaqaalaha u shaqeeyo hay'adda.

Hooyga Daryeelka

Falsafadda daryeelka bukaanka ku sugan dhimashada ee xoogga saarta fiyoobi baddalkii daweyn. Daryeelkaa hooyga daryeelka waxaa bixiya koox ka kooban aqoonyaan ka shaqeysa dareeylka caafimaadka ee kala socota maadooyin badan ee wax ka qabta baahida jirka, caatifadda iyo nafsiga bukaanka iyo qoyska, taasoo qoyska siisa adeegyada taageerada calool xumada. Inta badan hooyga daryeelka waxaa lagu qabtaa gurigya, hase ahatee waxaa kaloo laga heli karaa isbitaalada, goobaha xanaanada iyo hooyga daryeelka la daggan yahay.

Hooyga Daryeelka La Daggan Yahay

Goob bukaanka hooyga daryeelka siisa adeegyada guriga iyo taakuleynta 24 oo la mid ah sida guri.

Nolosha La Kaalmeeyo

Fikrada ku saabsan adeegga, ma aha goobta. Badanaa, barnaamijyada nolosha la kaalmeeyo waxaa ka mid ah adeegyada sida cuntada, nadaafadda guriga, gaadiidka, hawlaha nasashada iyo siistemka jawaabta degdegga.

SI AAD U HESHID MACLUUMAAD DHEERAAD AH AMA TIXRAACIN

Shabakada Hooyga Daryeelka iyo Daryeelka Xanuunka Minnesota (Minnesota Network of Hospice & Palliative Care) (MNHPC)
2365 McKnight Road N, Suite 2
North Saint Paul, MN 55109
p 651.659.0423 / 800.214.9597
f. 651.659.9126
www.mnhpc.org

Ururka Hooyga Daryeelka iyo Daryeelka Xanuunka Qaranka (National Hospice and Palliative Care Organization)
800.658.8898

SI AAD U HESHID MACLUUMAAD KU SAABSAN MEDICARE IYO SHATTI BIXIN

Waaxda Caafimaadka Minnesota (Minnesota Department of Health):
651.201.4101
MinnesotaCare: 651.297.3862
Medicare: 800.MEDICARE (633.4227)

SI AAD U SOO GUDBISID ASHTAKO KU SAABSAN WAKAALADDA HOOYGA DARYEELKA

Xafiiska Cabbashada Daryeelka Muddada Dheer (Ombudsman for Long-Term Care)
651.431.2555
800.657.3591

Xafiiska Ashtakooyinka Hay'adda Caafimaadka (Office of Health Facility Complaints)
651.201.4201
800.369.7994

SI LOO HELO MACLUUMAADKA ILAHA BULSHADA

Khadka Xariirinta Waayeelka (Senior LinkAge Line)
800.333.2433

MINNESOTA NETWORK OF
HOSPICE & PALLIATIVE CARE

www.mnhpc.org